

## **AMARKA N. 5**

### **MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOMALIA**

#### **MAAMULUHU**

MARKUU arkay Sharciga 8 Febaraayo 1950 n. 12;

MARKUU arkay Decreetada Madaxweynaha ee ku taariikhaysnayd Maars 31, 1950;

MARKUU tixgeliyay baahida iyo deg degga loo qabo in la dejijo sharci dhuleed ee ku meel gaar ah;

MARKUU garwaaqsaday awoodda la siiyay;

#### **WUXUU AMRAYAA**

##### **Qod. 1**

Xeerarka sharciga ah ee ka jira dhulka ku yaallo gudaha taariikhda Maars 31, 1950 - waxaa ka mid ahaa kuwa uu soo saaray Maamulka Boqortooyada Ingiriiska kahor iyo kadib dhaqan galinta heshiiskii Nabadda ee lagu saxiixay magaalada Paris bishii Feebraayo 10, 1947 - waa la sii wadi doonaa in lagu dabaqo - marka laga reebo kuwa lagu tilmaamay qodobka soo socdo, gabi ahaan ama qeyb ahaanba.

Iyadoo la raacayo qawaaniinta ku xiga ee loogu talo galy in wax lagu kamilo, ama lagu beddelo sharciyada dalka ka jira si loo dhaqan geliyo mabaadii'da iyo qawaaniinta Qaanunka Qaramada Midoobay iyo Heshiiska Ilalinta oo ay ku ansixiyeen Golaha Maamulka Wasaayada magaalada Geneva, Janaayo 27, 1950.

##### **Qod. 2**

Saxnimada tilaaboyinka maamul iyo ficillada la qaata iyadoo la raacayo qawaaniinta ku xusan qodobka 1aad ee kor ku xusan waxay ahaanayaan kuwo shaqeynaya. Hase yeeshe, waxaa lagu dhawaaqi karaa mid aan waxtar lahayn xafiis ahaan ama codsi ay soo gudbiyeen dhinacyada daneynayo, oo maamulka uu ku soo saaro go'aan sanad gudihiis, laga bilaabo taariikhda dhaqan galka amarkan.

##### **Qod. 3**

Qodobbada cusub ee shuruucdan waxay ka dhaqan geleyaan dhulka maalinta 15aad ka dib markii lagu daabaco "Faafinta Rasmiga ah" ee Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya, marka laga reebo moooyee in lagu caddeeyo waqtii ka duwan kuwii hore ama si kale loo soo abaabulay.

Xeerarka danaha gaarka u leh dadka asaliga ah ayaa sidoo kale jiri doona in lagu ogeysiyo dadka laftooda iyada oo loo marayo ogeysiisyada dadweynaha ama habab kale oo ku habboon ujeeddadan.

##### **Qod. 4**

Qodobbada soo socda ee uu soo saaray Maamulka Boqortooyada Ingiriiska waa la laalay:

Baaqa L. 1 ee Febraayo 1, 1941 oo cinwaan-kiisu yahay "Awoodda Ciidamada".

Baaqa L. 2 ee Febraayo 21, 1941 oo cinwaan-kiisu yahay "Dembiyada Dagaal".

Baaqa L. 17 ee 10 Oktoobar 1941 oo cinwaan-kiisu yahay "Ku dhaqanka Sharciyada Talyaaniga".

Baaqa L. 19 ee 24 Oktoobar 1941 oo cinwaankiisu yahay "Dembiyada Dhalinta ay galaan".

Baaqa L. 6 ee Maars 6, 1942 oo cinwaankiisu yahay "Cadowga Ganacsiga".

Baaqa L. 12 ee 1da Febraayo 1942 oo cinwaankiisu yahay "Xisaabaadka Bangiga".

Baaqa L. 19 ee 15 May 1942 oo cinwaankiisu yahay "Dhacdo iyo Dhaar".

Baaqa L. 15 ee May 4, 1943 cinwaankiisu yahay "Maamulka Militariga Ingiriiska".

Baaqa L. 27 ee Agoosto 23, 1943 cinwaankiisu yahay "Khaadiyada".

Baaqa L. 33 ee 16 Oktoobar 1943 oo cinwaankiisu yahay "Hanti Cadow".

Baaqa L. 1 ee 13 Janaayo 1944.

Baaqa L. 11 ee 18 Oktoobar 1944 oo cinwaankiisu yahay "Maxkamadaha Dembiyada".

Baaqa L. 13 ee 1 Disember 1946

Baaqa L. 6 ee May 5, 1947

Baaqa L. 3 ee 1 Juun 1949 cinwaankiisu yahay "Maxkamadaha Baarista".

### **Qod. 5**

Xeerkani wuxuu dhaqan gelaya maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah wuxuuna dhaqan gelaya laga bilaabo Abriil 10, 1950.

Muqdisho, 11 Abriil 12, 1950.

**MAAMULAHA  
Fornari**